Daryeelka caafimaadka iyo ilkaha

17ka sebteembar oo ku aadan maalinta doorashada, waxaa go'aan laga gaari doona mustaqbilka dalka Iswiidan, xilkaasuna wuxuu saaran yahay adiga iyo aniga ba. Dhammaanteenna waxaa dusha naga saaran isla xilkaas. Codkaaga iyo kayga waa isku qiimmo. Haddaba miyaan kor u qaadna horumarka heerka sare ah, mise hoos ayaan u dhigna, anagoo karoonka shanaad ee canshuurta ka saarno khasnadda aanu wadajirka u leenahay? Miyaan horumarinaa hab-noleedka dalka Iswiidan – mise dusha ayaan u dhignaa?

Ummadda dalka Iswiidan ku nool waxay dhammaantooda xaq ku lee yihiin daryeelka caafimaadka. Baahida ummadda oo kaliya ayaa hogaamin karto markii ay u baahan yihiin daryeel iyo xannaanad. Sannadkan biloowgiisa waxaa hirgalay sharci cusub. Waa sharci ka hortagaayo in dadyoowga qaarkood laga hormariyo bukaanada kale ee daryeelka u baahan, kuwaaso adeegsanaayo caymisyo iyaga u gaar ah. Sharcigu wuxuu kalo hubsanayaa in karti dheeraadka daryeelka caafimaadka ayna cid kale oo dane gaar leh ka faa'iideysan. Ummadda dhammaantooda waxay xaq ku lee yihiin in daahid la'aan ay helaan daryeelka caafimaadka, iyadoo fiirogaar ah aanan la siinin dhaqaalahooda u gaarka ah, da'dooda, jinsigooda ama qollada ay ka tirsan yihiin.

Daryeelka caafimaadka ee dalka Iswiidan waa heer caalami ah
Daryeelka caafimaadka ee dalka Iswiidan waa heer caalami ah. Iyado la adeegsanaayo daawooyin cusub oo waxtar leh ayaa cudurro fara badan hab daawayntooda lagu guuleystay ama dhibaatadooda hoos loo dhigay, iyadoo haddana bukaanada da'dooda ay hadba sii kordheeyso.

Dalka Iswiidan iyo dalka Finland waa dalalka Isbahaysiga Yurub tirokoob ahaan ugu hooseeysa geerida dhallanka. Waxaa kolba sare u

kacda tirada ka badbaada cudurrada kanserka. Daryeelka caafimaadka ee dalka Iswiidan waa mid heer sare ah haddii la barbardhigo kuwa adduunweynaha. Teeda kale, kharashkiisa wuxuu ka hoseeyaa kuwa dalal badan ee qaarada Yurub ku yaala.

Laakinse daryeelka caafimaadka ee dalka Iswiidan waa la sii hagaajin karaa, hey'adaha maamulaan ammuuraha caafimaadka waxaa la siiyaay lacag dheeraad ah, taaso u suurtagelineeyso in ay sare u qaadan helida daryeelka iyo qaabilaada bukaanada. Tan iyo 1994 waxaa tirada takhtarrada lagu kordhiyay 4 400 qof, tirada kalkaalisooyinka iyo ummulisoyooyinka-na waxaa lagu kordhiyay qiyaastii 12 300 qof. Imminka waa in isla wadadaas aanan ka leexan.

Ballanqaadka helida daryeelka ee suurtagalka ah
Tan iyo 1da nofeembar 2005 waxaa la ballanqaadi karaa helida daryeelka dhammaan cudurrada la shaacbixiyay. Ummadda dhamaantood waxaa laga ballanqaadayaa in saddex bilood gudahooda ay helaan daryeelka la go'aamiyay. Taaso imminka keentay hoos u dhaca tirada bukaanada daryeelka sugi jiray. Haddii saddex bilood gudahooda aanan bukaanka daryeel laga siinin gobolka u ku nool yahay, waxaa daryeel laga siinayaa gobol kale. Guud ahaan waxaa la oran karaa in sannadka 2006 dhamaatkiisa maamulka gobolada ay muruqooda ku fulin doonanaa ballanqaadka daryeelka..

Dadweynaha dhammaantood waxay heli doonaan daryeelka caafimaadka ilkaha oo aanan kharsh badnayn
Waa in had iyo jeer ilko caafimaad leh la helaa. Tan iyo 1970-meeyadii carruurta iyo dhallinyarada da'dooda ka hooseeyso 19 sano waxay xaq ku lee yihiin daryeelka caafimaadka ilkaha oo lacag la'aan ah. Daryeelka lacag la'aanta ee carruurta iyo dhallinyarada waxay sare u qaaday heerka caafimaadka ilkaha ee qaranka. 1dii luuljo 2002 waxaa hirgalay sharciga ka badbaadinta kharashka badan, kaaso loogu talaggalay ummadda da'dooda ka sareeyso 65 sano. Taaso dad tiro badan u suurtagelineeyso in ay adeegsadaan habka daryeelka loo yaqaanno "implantat" iyo "protetik". Tan iyo waagaas dad tirodooda ka badan 130 000 qof ayaa daawayntaa noocaasi ah ka faa'iideystay.

Imminka waddadaas kama leexa mayno, waxaan ummadda dhammaantood u hirgelin doona daryeelka caafimaadka ilkaha oo cusub oo wanaagsan. Ummadda dhamaantood waa in ay awoodaan helida daryeelka caafikmaadka ilkaha. Waxaanu doonaynaa in an hoos u dhigno kharashka baaritaanka caafimadka ilkaha, sare-na u qaadno ka badbaadinta kharashyada badan. Kharashka baaritaanka caafimaadka ilkaha waa in u san ka badnayn 200 karoon.

Wax ku bediladeeda
Siyaasadayda oo ah in ummadda dhammaantood ay helaan daryeel wanaagsan oo badbaadin leh waxaa ka soo horjeeda siyaasadda isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo.

Xisbiga moderaterna waxay yiraahdaan waxaanu doonaynaa in daryeel caafimaad ee wadajirka loo maalgeliyay oo loogu talaggalay ummadda dhammaantood. Laakinse, dhabta waxaa ah, anago tusaale ka soo qaadanayno Maamulka Ammuraha Caafimaadka ee Gobolka Stockholms, in hab kale ay u dhaqmaan. Waxay doonayaan in saldhigga daryeelka caafimaadka iyo dhammaan isbitaalada ay gacanta u geliyaan shirkado rayid ah. Waxay doonayaan in bukaanada hab cadaaladxummo ah u kala horumariyaan, hadba caymiska gaarka ee uu bukaanka lee yahay, sida isbitaalka S:t Görans ee magaalada Stockholm la doonaayo in safka la kala horumariyo.

Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga marna ma yeeli doono in daryeelka caafimaad oo habdhiskaas leh. Markii adigu ad cagta soo dhigto isbitaal dadweynaha ka dhaxeeya ee bulshada maalgelisay, waa inaad isku hubtaa in daryeel helida ay ku xiran tahay xaaladaada caafimaadeed oo aysan wax kale ku xirnayn. Oo aysan marna ku xirnayn caymiska jirrada adiga ku gaarka ah. Daryeelka caafimaadka ee bulshada maalgelisay lagama dhigi karo daryeel leh safaf kala gooni ah oo ku salaysan awood dhaqaaleed.

Xisbiga moderaterna wuxuu kalo doonayaa in u sare u qaado kharashka daawada iyo daryeelka. Haddaba sidee ba lagu hagaajin karaa daryeelka caafimaadka haddii ba sare loogu qaado kharashka? Siyaasada noocaas ay waxay saamyn xun ku reebta dadka dalka ugu dhaqaale liito.

Dalka Iswiidan anagu aanu maamuli doono waa loo dhan yahay, adigu-se dalkee dooratay?